# Ogaysiis, Malayn, Abuurid, Ku xidhnaan

## Hawlaha Layaabka ah ee meelwalba



CMOA Columbus Museum of Art

## Ogaysiiska, Fikirka, Layaabka CMA

Raadi farshaxan kuu muuqda – waxaad doonaysaa inay kugu qaadato dhowr daqiiqo.

**Ogeysiis:** Farshaxanka u eeg si aamusnaani kujirto **(adigoon aqrin calaamada)** 30 ilbidhiqsi. Tilmaam: Si aad u ogaato faahfaahinta "soo dhawee" hal qayb oo keliya, sida aad ka dhex eegayso aaladda telescope. Indhahaaga ugu wareeji farshaxanka sidan. Kadib "iska fogee" oo fiiri waxa oo dhan. La wadaag aragtidaada kuwa kale ee kooxdaada ah.

**Ka fikir:** Maxaad u malaynaysaa inay dhacayaan? Maxaa dhici kara kahor iyo maxaa dhici kara oo kuxiga? Waa maxay qaababka, astaamaha, iyo midabbada kala geddisan oo macnahoodu noqon karaa? Maxaad ogaatay ee kaa dhigaya inaad sidaa u malaynayso?

**Layaab:** Maxaad su'aalo ka qabtaa shaqadan farshaxanka? Haddii aad la hadli kartid farshaxaniistaha, maxaad weydiin lahayd? Haddaad la hadli kartid farshaxanka laftiisa, maxaad weydiin lahayd?

## Ogaysiiska, Fikirka, Layaabka guriga

Isticmaal talaabooyinka Ogaysiiska-Kafikir-waxyaabaha Layaabka ee kor ku xusan si aad ugu fiirsato, u tarjunto, oo aad u hesho xog ku saabsan:

- Shay dabiici ah (sida lelndelion) ama gurigaaga (sida dahabka duugga ah ama qalab aan caadi ahayn)
- Wax uu sameeyay qof aad taqaanid (sida sawir gacmeed uu sameeyay walaal ama cumaamad uu sameeyay adeerkaa)
- Socod la yaqaan (sida albaabkaaga illaa sanduuqaaga boostada ama waddada aad maalin walba ka gudubto)

**Tilmaamaha ogaysiiska:**

- Isku day inaad sawirto shay si aad ogaato wax u dhaw
- Isku habee wax kasta oo aad aragto, oo ay ku jiraan qaybo yaryar oo sameeya qaybo waaweyn
- Waxyaabaha qaarkood ayaa aad u xiiso badan markaad kala qaadatid (sida cookie, qalin, ama caag jaban). Weydii qof weyn haddii aad u aragto inuu badqabo si aad ugu kala qaado walaxdaada.

**Natiijada kasoo baxda:**

Maxay ahayd wax qurux badan oo xiiso leh waxa aad baadhay? Maxaad ogaatay ee kaa yaabiyay? Maxaad ku baratay adigoo ku eegaya qaabkan gaabiska ah, ee taxaddarka badan? Maxaad rabtaa inaad waxbadan ka ogaato?




## Ogaysiiska, Xidhidhinta, Abuurista CMA

Raadi farshaxan oo adiga xiiso kuu leh. Samee naftaada mid raaxo leh; isticmaal kursiga agtaada ah ama miis, ku dheji agab sawiro, ama ku fadhiiso sibidhka.

Si dhow u fiiri (isticmaal ogeysiiska, Ka fikir, talaabooyinka ah). Maxaad ogaatay? La wadaag indha indheyn badan dadka kale ee kooxdaada.

Sideed ugu xidhiidhin kartaa farshaxanka naftaada (cida, meesha, iyo goorta adigu)? Ma jiraan xidhiidho lala yaabo?

Dooro hal shay oo adiga iyo farshaxanka isku kiin xidhaya. Adeegso agabka aasaasiga ah ee la bixiyay si aad u abuurto wax matalaya isku xidhnaantaas. La wadaag habka fikirkaaga kuwa kale ee kooxdaada ah.

## Ogaysiis, Xidhiidh, Abuur guri

Sawir khariidad sida aad ugu xidhmi karto ugu yaraan toban qof ama meelo kala duwan (dhab ah ama la qiyaasay). Tijaabi noocyada kala duwan ee laymanka, midabada, iyo calaamadaha si ay u matalaan isku xidhnaanta. Intee ayuu xidhiidhkani adagyahay? Sideed ugu matali kartaa dareenkaaga ku wajahan qofkaan ama meeshan? U noqo mid toosan ama kusalaysan mala'awaal sida aad jeceshahay.

Banaanka u bax oo isticmaal nuuradda wadada dhinaceeda ama waxyaabaha dabiiciga ah (sida ulaha, caleemaha, iyo dhagaxyada) si aad u abuurto biriishyo, jidad, ama noocyo kale oo wax isku xidha ah oo u dhexeeya waxyaalaha aad u aragto sida haramaha, dillaacyada, walxaha dhacay, iyo tiirarka calaamadaha.

Ku Ururi kaadhadh boostada oo udir qof. Kaadhka dhexdiisa, u sheeg inay ku qoraan boostada kaadhka qof kale oo ilaali in silsiladu sii socoto.

## Agabka lagu ciyaaro ee CMA

Raadi farshaxan oo u eg meel aad rabto inaad booqato. Dheeho oo arag faahfaahinta kala duwan ee meeshan.

Qiyaas inaad gudaha u gasho goobta. Dhawaaqyadee ayaad maqashaa? Waa Maxay urta iyo dhadhanka aad la kulmi doontaa? Sidee hawadu uga dareemaysaa maqaarkaaga? Waxqabadyo noocee ah ayaad halkaan ku sameyn laheyd, iyo sababtee?

## Agabka lagu ciyaaro ee guriga

Raadi sawir joornaal, buug, ama warqad la iska tuuray. Suuree muuqaal ka mid ah fasaxaagii. Abuur sheeko ku saabsan sida ay tahay halkan.

Qof ka jar joornaal ama warqad la iska tuuray oo ku dhaji warqad yar. Sawir hal shay oo fasaxagi ah oo laga yaabo in qofkani qaadanayo.

Adigoon sharrax ka bixin fikraddaada, weydii qof kale oo aad taqaan inuu shay ku daro goobta. Sii wad wareejinta sawirka u dhexeeya dadka kala duwan (adigoon fikradaha la wadaagin) illaa ay warqaddu ka buuxsanto. Hada fiiri muuqaalka cusub, iskaashiga. Maxay kula tahay sheekadu inay tahay?

Soo ururi qaar ka mid ah asxaabtaada ama qoyskaaga oo ku hoggaami iyaga booqashada gurigaaga, adoo u malaynaya inay tahay meel muuqaal qurxoon iyo inay yihiin dalxiisayaal wax indho indhaynaya. Samee sheekooyin cajiib ah oo ku saabsan meelahaaga maalinlaha ah.

**CMA-da, hal-abuurnimadu waa habka loo adeegsado mala-awaalka iyo fikirka adag si loo abuuro fikrado cusub oo qiimo leh.**

## Sideed u abuuri doontaa manta?

Kheyraadkan waxaa lagu horumariyey iyadoo taageero laga helayo:

BATTELLE

